

# Kusoo biir Barnaamijka Tijaabada ah ee Qiimo Dhimista Safarta ee Ismaamulka Allegheny!

Allegheny County Department of Human Services (DHS, Waaxda Adeegyada Aadaha ee Ismaamulka Allegheny) ayaa raadinaysa dadka qaata Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP, Barnaamijka Caawimaada Kaalmada Nafaqada) ee jira da'aha 18 ilaa 64 si ay uga qaybgalaan barnaamijka 12 bilood ee biloowga ah si loo fahmo saamaynta qiimaha gaadiidku ku yeeshay dadka deegaanka ee danyarta ah.

## Qofkee u qalma Barnaamijka Tijaabada ah ee Qiimo Dhimista Safarta ee Ismaamulka Allegheny?

Ka qaybgaleyaasha u qalma:



Hadda dagan  
Ismaamulka Allegheny



Qaadanaayay gunnooyinka SNAP bisha  
Sibteembar 30, 2022



Jira inta u dhexaysa  
da'aha 18 iyo 64



Aan haysan xubin kale oo qoyska ah oo  
jira 18 ilaa 64 sano kaasoo horay uga  
qaybgalaayay tijaabada

## Sidee barnaamijka tijaabada ah u shaqeeyaa?

Ka qaybgala tijaabada waa ikhtiyaari laakiin waxaa ku jira inaad aqbasho inaad xogtaada nala wadaagto iyo inaad buuxiso xog aruurin mararka qaar. Ka qaybgaleyaasha u qalma ayaa si qori tuur ah loogu dari doonaa mid kamid ah sadexda kooxood:

1

**Gaadiid bilaash lagu raacaayo:** Kooxdaan ayaa heli doona gaadiid ay bilaash ku raacayaan dhammaan safarada PRT muddo 12 bilood ah.

2

**50% qiimo dhimis ah:** Kooxdaan ayaa heli doona kaarka ConnectCard kaasoo yaraynaaya qarashka dhammaan safarada PRT nus kamid ah qiimaha (50%) muddo 12 bilood ah, horayna loogu shubay lacag dhan \$10.

3

**Ma heli doonaan wax qiimo dhimis ah:** Kooxdaan waxay heli doonaan kaarka ConnectCard oo ay horay ugu jirtay \$10 laakiin ma heli doonaan qiimo dhimis ku aadan qarashka safarka.

## Muxuu barnaamijku u yahay mid tijaabo ah badelka uu ka noqon lahaa mid rasmi ah?

Tijaabo waa fursad muddo kooban jirta si wax looga barto ka qaybgaleyaasha ayadoo yoolku yahay faahfaahinta naqshada barnaamij rasmi ah.

DHS waxay doonaysaa inay fahanto sida dadka deegaanka ay uga faa'iidaysan karaan hoos u dhigista qiimaha gaadiidka dadwaynaha. Tan waxaa ku jiri doona baarista saamaynta gaadiidka wadaaga ah iyo in ay korodhay tagitaanka shaqada, adeegyada iyo baahiyaha kale ee dadka deegaanka.



Si aad xog badan u hesho aadna u codsato, booqo:  
[DiscountedFares.alleghenycounty.us](https://DiscountedFares.alleghenycounty.us)



Allegheny County  
Discounted Fares  
Pilot Program

